





Magaalladaada. Codkaaga.

Oktoobar 22

toronto.ca/elections



Call **3 1 1**



Isbeddellada Xaafadaha

Waxaa jira isbeddello ku yimid xudduudaha xaafadda doorashada dowladda hoose ee 2018. Isbeddelladan waxaa ay dhaqan-geli doonaan 1-da Diseembar, 2018 marka muddada xilka golaha uu bilowdo. Si wanaagsan si aad u fahamto isbeddellada ku yimid xudduudaha xaafadda waxaad:

- Isticmaali kartaa MyVote (toronto.ca/elections/myvote) si aad u eegto xaafadda aad ka coddeyn doonto iyo cidda u taagan doorashada xaafaddaada
- Fiiri khariidadaha xaafadaha iyo goobaha cod-bixinta

Faahfaahinnada ayaa la heli karaa adigoo booqanaya mareegtadeenna toronto.ca/elections ama adigoo naga soo wacaya lambarka 416-338-1111.

MyVote

MyVote waxaa ku qoran wax walba oo aad u baahantahay. Si aad u biloowdid MyVote, geli cinwaankaaga Toronto kadibna:

- Raadi xaafadaada iyo khariidadaada
- Eeg musharaxiinta ku tartamaya doorashada xaafadaada
- Oggoow haddii aad ku jirto liiska cod-bixiyeyaasha
- Ku dar ama cusbooneysi macluumaadkaaga ee liiska cod-bixiyeyaasha (ilaa 1-da Oktoobar)
- Oggoow halka laga coddeeyo iyo goorta la coddeeyo
- Daawo oo daabac Kaarkaaga Macluumaadka Cod-bixiyaha
- Hel macluumaadka lagu oggaado goobtaada cod-bixinta (laga bilaabo 1-da Oktoobar)
- Daawo naamuunadda warqadda cod-bixintaada (laga bilaabo 1-da Oktoobar)

Goobaha cod-bixinta waxaa ku waajibaya isbeddel, sidaa awgeed fadlan sii-wad in aad eegto MyVote ka hor inta aadan aadin goobta si aad u coddeeyso.

Qalab online-ka ah oo aad ka heli karto wax kasta ee aad u baahantahay si aad u coddeeyso.

toronto.ca/elections/myvote

Fursadaha Cod-bixinta

Qofkee Coddeyn Kara

Waxaad ka coddeyn kartaa doorashada dowladda hoose ee Toronto haddii aad tahay:

- Muwaadin Kanadiyan ah; oo
- ugu yaraan 18 sano jir ah; oo
- ah qof deggan magaallada Toronto; ama
- ah qof aanandegganayn Toronto, balse adiga ama xaaskaaga/ninkaaga aad leedihiin ama uu idin kiraysanyahay guri ku yaala magaallada; oo
- lagaaga mamnuucin coddeynta si waafaqsan sharci kasta.

Waxaad ka coddeyn kartaa oo keliya halmar doorashada ka dhacaysa dowladda hoose ee Magaallada Toronto ayada oo aan la eegaynin inta guri ee aad ku leedahay ama kaaga kireysan Magaallada Toronto. Waa in aad ka coddeysid xaafadda aad ku nooshahay.

Maalinta Doorashada

Isniin, 22-ka Oktoobar, 2018, laga bilaabo 10 subaxnimo ilaa 8 fiidnimo.

Coddeynta Hormariska Ah

Arbaco, 10-ka Oktoobar ilaa Axad, 14-ka Oktoobar laga bilaabo 10 subaxnimo ilaa 7 fiidnimo.

Goobaha coddeynta hormariska ah waxaa ay ka muuqan doonaan Kaarkaaga Macluumaadka Cod-bixiyaha ama ogoow adiga oo adeegsanaya MyVote.

Isticmaal MyVote si aad u daabacdo Kaarkaaga Macluumaadka Cod-bixiyaha ama ku muuji telefoonkaaga gacanta marka aad coddeynayso.

Dhismaha Dowladda Hoose

Arbaco, 10-ka Oktoobar ilaa Axad, 14-ka Oktoobar laga bilaabo 10 subaxnimo ilaa 7 fiidnimo.

Waxaad ka coddeyn kartaa Dhismaha Dowladd Hoose ee magaallada Toronto, 100 Queen Street W., inta lagu guda jiro coddeynta hormariska iyadoo aan la tixgelinayn meesha aad magaallada kaga nooshahay.

Aqoonsiga (ID)

Si aad u coddeyso waa in aad muujiso aqoonsi ku qoran magacaaga iyo cinwaan Toronto ah oo xaq u leh.

Ka fogoow safka maalmaha coddeynta. Ka soo muuqo liiska cod-bixiyayaasha kadibna la imaaw Kaarkaaga Macluumaadka Cod-bixiyaha.

Kasoo muuqo Liiska Cod-bixiyeyaasha

Waa muhiim in aad eegto haddii macluumaadkaaga uu sax yahay, gaar ahaan haddii aad guurtey ama aad iska beddeshay magacaaga tan iyo doorashadii ugu dambaysay. Ku jiridda liiska cod-bixiyeyaasha Magaallada Toronto waxaa loola jeedaa in aad hesho Kaarka Macluumaadka Cod-bixiyaha uu dedejinayo waqtiga aad ku qaadato goobta cod-bixinta.

 89 Northline Road Toronto, ON M4B 3G1	Doorashooyinka Dowladda Hoose Xaafadda: 1 Waaxda hoose: 24	 Lettermail Poste-lettres 7102858	VOTE October 22 toronto.ca/elections
Coddeynta Hormariska Ah			
Arbaco, 10-ka ilaa 14-ka Oktoobar, 2018 – 10 subaxnimo ilaa 7 fiidnimo.			
Ka coddee hal goob	Dhismaha Dowladda Hoose ee Toronto, 100 Queen St., W. Tusaale ahaan Xarunta Bulshada, 123 Tusaale Rd Tusaale Xarunta Madadaalada, 231 Tusaale Dr		
Maalinta Doorashada			
Isniin, 22-ka Oktoobar, 2018 – 10 subaxnimo illaa 8 fiidnimo.			
Ka coddee	Dugsiga Guud ee Dadweynaha (General Public School) – GYM 2345 LongDrive Stree		
Taageerada dugsigaaga waxaa loo qoray sida: Katoolik Faransiis ah			


9345678
Marka loo eego cinwaanka xaqa u leh

Hore u qaado Kaarkaaga Macluumaadka Cod-bixiyaha marka aad u baxaysid in aad soo coddeyso.

Laga bilaabo 17-ka Sibteembar, Magaallada Toronto waxa ay oggolaan doontaa in dib loogu noqdo liiska cod-bixiyeyaasha.

- Waxaad habsan kartaa in aad ku jirto liiska cod-bixiyeyaasha adigoo wacaya lambarka 416-338-1111.
- Waxaad shaqsi ahaan wax ugu dari kartaa ama cusboonaysiin kartaa macluumaadkaaga adigoo ku buuxinaya Codsiga Wax-ka-beddelka Liiska Cod-bixiyeyaasha goobaha Xafiisyada Karaaniga Magaallada ama adigoo wacaya lambarka 416-338-1111.
- Si magacaaga uu uga soo muuqdo liiska cod-bixiyeyaasha kama dambayska ah ee maalinta doorashada, muraajaceynta oo dhan waa in la dhammeeyo 14-ka Oktoobar. Wixii taariikhdan ka dambeeya waxaa isaga dari kartaa goobta cod-bixinta marka aad coddeynta aado 22-ka Oktoobar.

Online-ka ka eeg, wax ugu dar ama tafatir ugu samee macluumaadkaaga adigoo adeegsanaya MyVote laga bilaabo 17-ka Sibteembar ilaa 1-da Oktoobar.

Isticmaal MyVote (toronto.ca/elections/myvote) si aad:

- U eegto haddii aad ku jirto liiska cod-bixiyeyaasha
- Ugu darto magacaaga liiska cod-bixiyeyaasha
- U tafatirto macluumaadkaaga cod-bixiyaha

Xasuusnow: in aad soo qaadato aqoonsi marka aad u baxeyso cod-bixinta, xataa haddii aad isku dartey liiska cod-bixiyeyaasha.

Diyaafadinta looogu talagalay Cod-bixiyeyaasha

Goobaha Cod-bixinta

Dhammaan goobaha cod-bixinta waxa ay noqon doonaan kuwo la geli karo macluumaadka ku saabsan goob kasta waxaa laga heli karaa mareegtadeenna: toronto.ca/elections/voters.

Qalabka Cod-bixinta ee La Heli Karo

Qalabka Voter Assist Terminal waa aalad saxda warqadda cod-bixinta oo u oggolaanaysa cod-bixiyayaasha naafada ah iyo kuwo kale ee baahiyada gaarka ah leh in ay u saxaaan warqadooda cod-bixinta si madaxbannaan oo gaar ah. Waxyaabaha ay leedahay waxaa ka mid ah shaashad la taabto, qayb maqal ah, loox-xarfeedka indhoolayaasha e braille, aaladda tuubbada Buufinta/Babashada, qayb cagaha lagu shaqeysiiyo ee Rocker Paddle/Foot Switch iyo qaybo lagu weyneeyo si loo hagaajiyo farta iyo midabka qoraallada.

Qalabka Voter Assist Terminals waxaa laga heli karaa dhammaan goobaha coddeynta hormariska ah. Haddii aad u baahantahay in aad adeegsato qalabka Voter Assist Terminals maalinta doorashada oo aanna la keenin goobta cod-bixinta ee lagu qoondeeyay, waxaad codsan kartaa in codkaaga la wareejiyo adigoo wacaya lambarka 416-338-1111.

Wakiilka Coddeynta

Haddii aadan awoodin inaad codkaaga dhiibato mid ka mid ah maalmaha cod-bixinta sabab kasta ha ahaatee, waxaad magacaabi kartaa qof kaa wakiil ah oo adiga kuu coddeyn kara adigoo buuxinaya foomka Magacaabidda Wakiilka Coddeynta.

Foomamka Magacaabidda Wakiilka Coddeynta waxaa laga soo qaadan karaa oo laga sharciyeyn karaa goobaha ay ku yaallaan Xafiisyada Karaaniga Magaallada ilaa maalinta doorashada. Macluumaad baddan waxaa laga heli karaa mareegtada Adeegyada Doorashada: toronto.ca/elections/voters..

Adeegyada Kale

- Tilmaamaha ku saabsan sida loo coddeeyo waxaa laga heli doonaa dhammaan goobaha cod-bixinta oo ku qoran luuqadda indhoolayaasha ee braille iyo 26 luuqadood.
- Xaashiyada far waaweynaynta waxaa laga heli doonaa dhammaan goobaha cod-bixinta si ay u caawiyaan cod-bixiyeyaasha aragoodu uu hooseeyo.
- Haddii aadan jir ahaan awoodin in aad gasho goobta cod-bixinta, waxaad codsan kartaa in laguugu caawiyo goob kale oo ku dhex taala goobta cod-bixinta. Tusaale ahaan goobta gawaarida la dhigto ama kaabiga. Wac lambarkan 416-338-1111 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.
- Macluumaadka doorashada ee dhagoolaha ama dadka maqalka ku adag waxaa la heli karaa adigoo ka wacaya khadka TTY 416-338-OTTY (0889).
- Waxaa kula imaan kara saaxiib si uu kuu caawiyo haddii aadan keligaaga awoodin in aad calaamadeyso warqadaada cod-bixinta ama waxaad caawimo weyddiisan kartaa sarkaalka doorashada.
- Dhammaan goobaha cod-bixinta waxa ay soo dhoweynayaan adeegsiga dad ku taageera iyo adeegga xayawaanka.

Haddii diyaafadintan midkood aan haqabtirin baahiyadaada fadlan naga soo wac lambarkan 416-338-1111.

**Haddii aad caqabad kala kulanto coddeynta
nagala soo xiriir lambarkan 416-338-2020.**

Aqoonsiga La Aqbali Karo

Aqoonsi (ID) ayaa loo baahanyahay marka aad coddeynayso. Xasuuso in aad la timaado hal aqoonsi oo ka muuqdo magacaaga iyo cinwaanka Toronto ah oo xaq u leh doorashada. Kaarkaaga Macluumaadka Cod-bixiyaha looma adeegsan karo aqoonsi ahaan.

Tusaalooyinka Aqoonsiga La Aqbali Karo:

- Kaarka sawirka leh ee Ontario laga bixiyay, shatiga daraawalka ama ruqsada gawaarida (qayb gawaari ah).
- Jeeg shaqsi oo la nasakhey, kaarka bangigga ama bayaanka xisaab bangi.
- Biilka korontada, biyaha, gaaska, telefoonka ama fiilo TV ama biil ka ahaaday dhinaca guddiga adeegyada dadweynaha.
- Warqad lifaaq jeeg, bayaanka T4 ama rasiid lacag bixin uu soo saaro qofka loo shaqeeyo.
- Bayaanka dhigaalka tooska ah ee Shaqooyinka Ontario ama Barnaamijka Taakulaynta Naafada Ontario.
- Qiimaynta canshuurta hanti maguurto ah, oggeysiiska qiimeynta canshuurta dakhliga, bayaanka Dheefaha Canshuurta ee Ilmaha.
- Bayaan amaah guri, heshiis kiro ama ijaar xiriir la leh.
- Qoraal ama kaar warbixin ka socda iskuulka kadib-dugsiga sare.
- Dokumeenti muujinaya degganaanshaha xaramka jaamacada, midkaas oo laga soo saaray dhinaca xafiiska ama shaqaalaha mas'uulka ka ah degganaanshaha ardayga ee machadka kadib-dugsiga sare.
- Dokumeenti kasta oo kale oo ka socda dhinaca dowlada Kanada, Ontario ama dowlad hoose ee ku taala gudaha Ontario ama dokumeenti ay soo saartey ama sharciyeysay maxkamad ku taalla Ontario.
- Dokumeenti kasta oo ka socda dhinaca Guddiga Urur ku yaala Ontario midkaas oo loo dhisey si waafaqsan Xeerka Hindida (Kanada).
- Siyaasada ceymiska ama bayaanka ceymiska.
- Heshiis deyn ama heshiis dhaqaale kale midkaas oo ah machad dhaqaale.
- Bayaan ah Dheefaha Ceymiska Shaqaalaynta La bixiyay T4E.
- Bayaanka Damaannada Waayeellada T4A (OAS), Dheefaha Qorshaha Hawl-gabka ee Kanada T4A (P), Bayaanka Wax-ku-biirinta Qorshaha Hawl-gabka Kanada.
- Ammaanka Goobta Shaqada iyo Bayaanka Dheefaha Ee Guddiga Ceymiska T5007.
- Kaarka CNIB ama kaar ka ahaaday dhinaca urur sadaqo diiwaangashan midkaas oo siinaya adeegaha dadka qabba naafooyinka.
- Dukumeenti muujinaya deegaanka ah guri daryeel muddo-dheer ah oo ah hoosta Qaanuunka Guryaha Daryeelka Muddada-Dheer, 2007, midaas oo uu soo saaro Maamulaha guriga.
- Kaar ama diiwaan cusbitaal.

Haddii aadan haysan aqoonsi la aqbali karo oo aadanna ku jirin liiska cod-bixiyeyaasha, waxaa lagu weyddiisan doonaa in aad lasoo noqoto aqoonsigaaga si aad u hesho warqadda cod-bixinta.

Taariikhaha Muhiimka ah ee Oktoobar

10-ka Oktoobar ilaa 14-ka Oktoobar: Coddeynta Hormariska ah laga bilaabo 10 subaxnimo ilaa 7 fiidnimo.

14-ka Oktoobar: Maalinta Ugu Dambaysa Coddeynta Hormariska Ah

22-ka Oktoobar: Maalinta Doorashada laga bilaabo 10 subaxnimo ilaa 8 fiidnimo.

Goobaha Ay Ku Yaallaan Xafiiska Karaaniga Magaallada

Isniin ilaa Jimco, 8:30 subaxnimo ilaa 4:30 fiidnimo goobahan soo socda:

- Dhismaha Dowladda Hoose ee Toronto, 100 Queen St. W., Waqooyiga Dabaqa1-aad
- Xarunta Madaniga ee Etobicoke, 399 The West Mall, Dabaqa Ugu Weyn
- Xarunta Madaniga ah ee North York, 5100 Yonge St., Dabaqa Dhulka
- Xarunta Madaniga ah Scarborough, 150 Borough Drive., Dabaqa 3-aad
- Xafiiska Adeegyada Doorashada Toronto, Waddada 89 Northline

Nagala soo xiriir

Mareegto: toronto.ca/elections

limayl: elections@toronto.ca

Adeegyada Doorashada: 416-338-1111

Helitaanka Diyaafadinta : 416-338-2020

limaylka Gaaritaanka: accessibleelections@toronto.ca

TTY: 416-338-0889



@torontovotes



@torontovotes



Toronto Votes